**XEERKA n. 121 rep.**

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

## MAAREEYE

MARKI UU ARKAY wareegtada madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 diseembar 1952, n. 2357;

MACLUUMAAD KU SAABSAN D. A. n. 83 taariikhda maajo 29, 1952, oo dhidibada loogu aasey dugsiga hoose ee Soomaalida ee dadka waaweyn, isla markaana hagaajinaya mushaarka macallimiinta iyo shaqaalaha maamulka;

MARKI UU ARKAY D. A. n.176 ee rep. nobambar 29, 1953, kaas oo wax ka beddelaya wreegtadii hore;

MARKI LA AQOONSADAY fursadda lagu cusbooneysiinayo la'iskuna dhexgeliyey xeerarkii aan soo sheegnay ee la xiriira dugsiga hoose ee dadka waaweyn, dejinta nadaamka iyo barnaamijyada dugsiyada laftooda, iyo mushaarka shaqaalaha macallimiinta iyo maamulka;

MARKI UU ARKAY D. A. n. 61, maajo 24, 1954, oo la xiriirta macallimiinta mas'uulka ka ah iyo badalka macallimiinta dugsiyada hoose ee Soomaaliya;

MARKI UU DHEGEYSTAY Golaha Dhexe ee Dugsiga;

MARKI UU DHEGEYSTAY Guddiga Maamulka;

## WUXUU XEEREEYAY

### Qod. 1.

Dugsiga hoose ee fiidki ee Soomaaliya, waxaa lagu asaasay D. A. n. 83 ee 29 maajo 1952, wuxuuna qaatay magaca "Dugsiyada Hoose ee Dadka Waaweyn".

### Qod. 2.

Dugsiyada hoose ee dadka waaweyn waxay ka kooban yihiin saddex dowro sanadle ah oo soconaya ku dhowaad 7 bilood midkiiba.

Dowrooyinka ayaa sida caadiga ah bilaabma 1da agoosto, waxayna dhammaanayaan 28ka febraayo, marka laga reebo Gobollada bari, halkaas oo ay ka bilaabaan oktoobar 1-deeda oo ay ku dhammaanayaan abriil 30-keeda.

Waa isku qori karaan dugsiga hoose ee dadka waaweyn wana dhigan karaan dowrooyinka kuwa raba ee da'doodu aysan ka yareyn 15 sano.

### Qod. 3.

Waxbaristu waa laba-afle, waxaana lagu bari karaa afka talyaaniga ama afka carabiga. Si kastaba ha noqotee, isticmaalka Afka Soomaaliga waxaa loo ogol yahay inuu ahaado luqada gudbinta.

Dhamaadka sedexda koorso ee lagu xusay qodobka hore, ardayda ku soo qaatay waxbarashada afka talyaaniga waxay awood u yeelan doonaan in ay qaataan dowrada luqada carabiga ah oo ikhtiyaari ah (sidoo kale waa todobo bilood), kuwa ku soo qaatay waxbarashada luqada carabiga waxay awoodi doonaan sidoo kale raacashada dowrada luqada Talyaaniga oo iyaduna ikhtiyaari ah.

**Qod. 4.**

Dowroorad kasta ee Dugsiyada Hoose ee Dadka Waaweyn waxaa oggolaaday Maamulaha dhexe ee Dugsiga Hoose, marka ay soojeedin ka timaado Maamulaha Waxbarashada awoodda u leh, mana ka yaraan karaan kuwa qoran 15 arday, waana in ay celcelis ahaan joogaan ugu yaraan 12 arday.

Oggolaansho kasta waa inuu xusayaa macallinka mas'uulka ka ah dowrada, oo nuqulna lagula wadaago Waaxda Horumarinta Bulshada.

**Qod. 5.**

Dowrooyinka ayaa u dhici doona si isla mida oo la raacayo goobta barnaamijyada waxbaridda iyo jadwalka toddobaadlaha ah ee ku lifaaqan wreegtada hore.

**Qod. 6.**

Ogolaashaha Waaxda Horumarinta Bulshada iyo habraaca lagu tilmaamay qodobka 4, waxa la awoodaa dowrooyin sanadeed gaar ah oo loogu talagalay dadka waa weyn in loo dejin karo, iyo fulinta barnaamijyada gaarka ah ee ka jawaaba baahida gaarka ah iyo kuwa taagan.

**Qod. 7.**

Qiimeynta waxaa lagu muujiyaa toban-dhibcoodley: laga bilaabo 1 illaa 5 waa qiimeyn ku filnayn gudbid; 6 ilaa 10 waa qiimeyn ku filan. Dhiirrigelinta ayaa kaliya loogu talagalay imtixaannada, kalfadhiga koowaad ama labaad.

**Qod. 8.**

Heerarka waxbarasho ee Dugsiyada hoose ee dadka waaweyn ay bixiyaan waa:

a) Shahaadooyinka dalacsiinta, heerka labaad ee dowrada koowaad ilaa labaad iyo tan labaad illaa tan saddexaad;

b) Shahaadooyinka dalacsiinta, ee loogu talo galay kuwa la dalacsiiyay dhamaadka dowrda saddexaad;

c) Shahaado loogu talagalay kuwa ku gudbay imtixaanka kama dambeysta ah ee dowrooyinka khaaska ah (oo lagu xusay qodobka. 6).

Shahaaddada ku xusan xarafka b) ama shahaaddada ku xusan xarafka c) looma ogolaan karo gelitaanka dugsiyada sare.

**Qod. 9.**

Ardayda waxaa si ku meel gaar ah ama si joogto ah uga saari karaa dowrad Maamulaha Dugsiga marka:

a) a) uu geysto edeb la’aan soo noqnoqda ama daran;
b) uu ku xad gudubo diinta, anshaxa, akhlaaqda Dugsiga;
c) uusan tageynin casharrada una soo jeedin si ku filan;
d) uu muujiyo xiiseyn la’aan ama lahayn awood ku filan oo uu wax ku baran karo.
e) ay saameeyaan cudurada lakala qaado.

Ka soo horjeedka amarka ka saarida in ka badan toban maalmood ama soo noqod la'aan, rafcaan waxaa loo ogolaanayaa Maamulaha Waxbaridda Gobolka, kaas oo si kama dambeys ah u go'aamin doona.

**Qod. 10.**

Dhammaan macallimiinta Dugsiga hoose ee nooc kasta iyo heer walba waxaa laga rabaa inay bixiyaan 25 saacadood oo waxbarid ah usbuuc kasta, iyaaga oo aan wax baddel ah heleynin, Dugsiyada Hoose ee caadiga ah, ama Dugsiyada Hoose ee Dadka Waaweyn. Waxaa sidoo kale looga baahan yahay haddi codsi ka yimid mas'uuliyiinta aqoonta u leh, inay bixiyaan illaa 10 saacadood usbuucii oo waxbarid aan caadi ahayn, oo ka baxsan 25ka saacadood ee ugu horreeya, marka la bixiyo khidmadda saacadda ee soo socda;

a) Macallimiinta shahaaddo sare leh (u dhigma, loo xilsaaray, ama kuwa beddel ah) ama macallimiin hab raac leh ama ruqsad ka haysta Dugsiga Sare Sh. So. 5;

b) Kaaliyaha macallimiinta ama macallimiinta haysta shahaadada dugsiga hoose/dhexe Sh. So. 3,5

c) Macallimiin kale oo aan qalin-jabin, Sh. So 2,5.

**Qod. 11.**

Khidmad la mid ah tii saacaddii hore ayaa la siiyaa macallimiinta dugsiga hoose ee dadka waaweyn ee aan lahayn meelayn kale oo waxbaris ah.

**Qod. 12.**

Shaqaalaha maamulka si kasta ha noqotee, ee u xilsaaran kormeerka iyo tilmaamidda ee Dugsiyada Hoose ee dadka waaweyn waxay xaq u leeyihiin gunno sanadle ah oo dhan Sh. So. 25 dowrad kasta oo la ansixiyo. Lacagta ayaa loo qaybiyaa sida soo socota:

a) Maamula waxbaridda dugsiyada hoose ayaa leh: Sh. So. 6.50 dowrad kasta;

b) shaqaalaha xoghaynta waaxda waxbarashada hoose ee ka shaqeysa abaabulka iyo ka shaqeysiinta sh. So. 3,5 dowra kasta;

c) Maamulayaasha waxbaridda, ee loogu talagalay Dugsiyada dalka, So. 15 dowrad kasta.

**Qod. 13.**

Khidmadaha saacaddii la bixiyo ee qodobbada 10aad iyo 11aad, iyo gunnada shaqaalaha maamulka ee qodobka 12aad, waxaa la bixiyaa sanad walba dhamaadka dowrooyinka, iyadoo lagu saleynayo waxqabadka muuqada ee adeegga uu bixiyo qofka yeelanayo, oo uu soo ururiyo Maamulka Dhexe ee Waxbarashada Hoose.

Haddii dowrooyinka aan la dhamaynin sabab aan macquul ahayn, ama aysan bixin natiijooyin lagu qanaco, Maamulaha ayaa xaq u leh in uusan bixin khidmadaha la xiriira.

**Qod. 14.**

In kasta oo aan lagu xusin wareegtadan, waxa algu dhaqayaa "dugsiyada hoose ee dadka waaweyn" nadaamka iyo qawaaniinta ay ku shaqeynaya "Dugsiyada Hoose ee Soomaaliya".

**Qod. 15.**

Waa la tirtiray, qodobbada 3aad iyo 4aad ee D. A. n. 83 ee taariikhda 29 maajo 1952 iyo D. A. n. 176 ee 29 nofeembar 1953.

**Qod. 16.**

Wareegtadan waxay dhaqan geleysaa 1da Luulyo 1954.

Muqdisho, 13 setembar 1954.

Maareeye
**Martino**

*Arkay diiwaanka- diiwaangelinta n. 4, warqadda n. 104.*
*Muqdisho, 30 setembar 1954.*
*Garsoorka xisaabaadka ama TAM.*